

Fever in Children (Somali)

Qandhada carruurta



Ilmaha ayaa qandho leh haddii heerkulkoodu (temperature) ka sarreeyo 38°C. Carruurta dhammaan mar un qandho way yeelan doonaan. Waa mid ka mid ah sababaha ugu badan ee carruurta u arkaan takhtar waxayna badanaa ku keentaa waalidiinta inay welwelaan. Si kastaba ha ahaatee, aad bay dhif u tahay in qandhadu ay keento dhibaato mustaqbalka fog ah.



Qandho waa calaamad muujinaysa in habka difaaca ilmahaagu uu la dagaallamayo caabuq. Qandhada dhibaato uma keeneyso ilmahaaga, laakiin waxay keeni karaan gariir jirka ah (ama suuxdin) qiyaastii 1 ka mid ah 30-kii carruur oo ay qandho qabato.

Inta badan qandhada carruurta waxaa sababa caabuqyada fayraska. Inkastoo ay ku xiran tahay calaamadaha kale ee jirrada ilmahaaga, dhaktarkaaga waxa laga yaabaa inuu sameeyo baadhitaano si loo ogaado bakteeriyada ama fayraska keenay qandhada. Ogow, ilkaha soo baxaya ma keenaan qandho.

Daryeelka guriga

Haddii ilmahaagu uu leeyahay qandho, waxaad ku caawin kartaa inay soo roonaadaan adigoo:

- hubinaya inay cabbaan cabitaan badan oo sonkor leh
- adigoo u galinaya dhar khafiif ah oo lagu nasan karo
- adiga oo iyaga siinaya paracetamol-ka carruurta (Panadol, Dymadon) ama ibuprofen (Nurofen). Raac tilmaamaha ku qoran dhalada ama baakadka ay daawadu ku jirto si aad u ogaatid qiyaasta saxda ah. Ha siin in ka badan inta lagu taliyey in la siiyo 24 saacadood gudahood.
- ha ugu qubeyn biyo qabow iyo isbuunyo la qooyay.

Wixii talo caafimaad ah oo aan degdeg ahayn, wac 13 HEALTH (13 43 25 84) si aad ula hadasho kalkaaliso diiwaangashan 24 saacadood maalintii, todobada maalmood ee wiiggii qiimaha wicitaankana wuxuu la mid yahay adoo xaafada aad degan tahay wacaayo oo kale.



Weydiiso turjubaan haddii aad u baahan tahay.

Sida loo cabbiro heerkulka ama tembarajarka ilmahaaga

Waxaad ogaan kartaa heerkulka/tambarajarka ilmahaaga adigoo:

- kilkishooda galinaya qalabka tembarajarka lagu eego ee loo yaqaan thermometer
- ama adiga oo qalabka tembarajarka/heerkulka lagu eego ee loo yaqaan thermometer galinaya dhegta (haddii ilmahaagu jiro 6 bilood ama ka weyn).



Dareemayaasha infrared-ka iyo istiikarada jirka lagu dhajiyo **si sax ah uma** cabbiri doonaan tembarajarka/heerkulka ilmahaaga.

Goorta la arki karo dhakhtar

Gee ilmahaaga qaybta gargaarka degdega ah (emergency department) ee kuugu dhow haddii tembarajarkiisu/heerkulkiisu yahay **mid ka sarreeya 38°C** oo ay:

- da'doodu ka yar tahay 3 bilood
- ee uu kuula egyahay inuu aad u xanuunsan yahay ama uu wareersan yahay
- oo ay adagtahay in la toosiyo
- oo uu aad u ooyayo ayna adagtahay in la aamusiyo
- oo uu cabitaankooda iyo kaadidooda ay ka yartahay sidii caadiga ahayd
- oo ay ku adag tahay liqidda ama uu dhareer badan leeyahay
- oo ay dhutinayaan ama aysan si caadi ah u isticmaali karin gacmaha iyo lugaha.
- oo ay dhib ku tahay neefsashada
- oo ay calooshu aad u xanuuneysa
- oo ay luqunta ama qoorta adagtahay ayna dhibsanayaan iftiinka
- oo uu maqaarkoodu isu badalo buluug, ama mid sidii mid dhiig furan ah, gareey, ama maqaar baro guduudan, ama meelo purple ah leh
- oo uu jirkoodu leeyaha barar ama uu gaduud noqdo.
- ama ay dareemayaan xanuun marka la kaadinayo



Isla markiiba wac lambarka Saddexda Ebar (000) haddii ilmahaagu ay ku adagtahay neefsashada, bushimahoodu buluug noqdaan, ama ay suuxayaan.

Waxaa soo saartay Waaxda Gurmada Degdegga ah, Isbitaalka Carruurta ee Queensland. Waxaan qiraynaa talooyinka macaamiisha iyo daryeelayaasha. **Resource ID:** FS013 **Reviewed:** July 2022

Cudur-daar: Macluumaadkan waxaa soo saaray xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyadoo ujeedaduna tahay in loo isticmaalo tilmaame kaliya waxaana loogu talagalay in lagu taageero, ee aan lagu beddelin, wadhadalka lala yeelanayo dhakhtarka ilmahaaga ama xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka. Macluumaadka si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa, markaa fadlan hubi inaad tixraacayso nuqulkii ugu dambeeyay. Raadso la-talin caafimaad, ee markaas ku habboon, walaacyada ku saabsan caafimaadka ilmahaaga.